

Wakhtiga soo gaadhsiinta

Muddada ay qaadaneysa in lagu soo gaadhsiiyo dalabka alaabtayada u dhiganata ama u dhow dawada waa sidan hoos ku xusan:

- Alaabaha kaalamada cudurka macaanka, nafaqooyinka, xafaayadaha iyo stomi-ga waxaa ay qaadataa shan (5) maalmood oo maalmaha shaqada ah.
- Tuumbada stomi-ga (trakeostomiprodukter) waxaa ay qaadataa todoba (7) maalmood oo maalmaha shaqada ah.
- Alaabaha bilaa gluten-ka ah waxaa ay qaadataa toban (10) maalmood oo maalmaha shaqada ah.
- Alaabaha loo haysto ruqsad waxaa ay qaadataa tobam (10) maalmood oo maalmaha shaqada ah.

Alaabaha ruqsada gaarka ah loo haysto waa alaabo aan ku jirin heshiiska alaabaha lagu heshiiyey in la kala iibsado. Badeecada ama alaabaha noocaas oo kale ahi ma yaalaan bakhaarada qaybiyaasha, waxaa ay markaas taas macnaheedu tahay in wakhtiga soo gaadhsiintu uu ka dheeraado wakhtiga caadiga ah.